



JAHEYNTA LOOGA

Illaalinayo Dacwaha Xadgudubka iyo Dhibaateynta

Waxaa daabacay

Xafiiska Maxkamadaha ee Maamulka laanta
Garsoorka Maine

Juun 2019

SOMALI

FOOMAMKA MAXKAMADDA

Koobiyada korontada ah ee foomamka hoose waxaa laga heli karaa websaydka Laanta Garsoorka www.courts.maine.gov/fees_forms. Foomamka warqada waxaa looga heli karaa si bilaash ah Xafiiska Karaani walboo Maxkamadda Degmada.

Si loo bilaabo Illaalada Xadgudubka ama Illaalada Dacwada Dhibaateynta, dhameystir midkood:

- PA-001 Cabashada Illaalada Xadgudubka (dacwoodaha) *AMA*
- PA-006 Cabashada Illaalada Dhibaateynta (dacwoodaha).

Foomamka lagu isticmaalay labadaba Illaalada Xadgudubka iyo Illaalada dacwadaha Dhibaateynta:

- PA-017 Ogeysiin Muhiim ah oo Dacwoodaha (dacwoodaha) (dambiga ka dhigo bayaan been ah) (loo baahanyahay).
- PA-005 Warbixinta Adeega Illaalada Amarka (dacwoodaha) (wuxuu ku caawiyaa fullinta sharciga inay raadiyaan in eedeysanaha ogeysiin siiyo dacwada)(loo baahanyahay).
- PA-015 Afidheefidka Ciwaanka Qarsoodiga ah/Lambarka Taleefonka (dacwoodaha) (wuxuu ku hayaa warbixinta xiriirka si qarsoodi ah oo sababaha badbaadada)(iqtiyaar ah).

FOOMAMKA DHEERAADKA AH

- FM-050 Afidheefidhka taageerada Canuga (oo Illaalada dacwada Xadgudubka, haddii xisbiyada waxay leeyihiin caruurta yar oo ay la jiraan oo ma jiraan amarka taageerada canuga wuu diyaarsanyahay).
- PA-012 Mooshinka Xukunka hore ee Dacwoodaha ee Ka tanasulayo Cabashada (dacwoodaha).
- PA-013 Mooshinka lagu Kordhinayo Amnarka Illaalada (dacwoodaha).
- PA-022 Mooshinka Xukunka hore ee Dacwoodaha oo lagu Badelayo/Mooshinka si loo Joojiyo Illaalada Amarka (dacwoodaha).
- PA-010 Mooshinka Eedaysanaha oo lagu Joojiyo Amarka Ku meelgaarka ah oo Illaalada ama lagu Badelayo/ka Badelida (la Afidheefidka lagu daray) (eedaysanaha).
- CR-CV-199 Ogeysiinta Badelka Ciwaanka (dacwoodaha iyo/ama eedaysanaha, sida loogu baahanyahay).

SU'AALAHA KU SAABSAN DACWADAHA ILLAALADA: AQRI JAHEYNTA OO DHAN

Dacwad noocee ayaan xareeyaa?

Haddii adiga iyo eedaysanahaaga aad hadeer leedihiin ama aad yeelateen shukaansi ama xiriir gaar ah, ee ka midka ah noocyada kale ee xiriirada, waxaad xareyn kartaa Illaalada dacwadaha Xadgudubka.

Si loo xareeyo Illaalada dacwada Dhibaateynta, ma jiraan xiriir hore oo loo baahanyahay.

Miyay jiraan qidmooyinka ama qarashaadka lagu xareynayo dacwada?

Illaalada xadgudubka ma jiraan qidmooyin lagu xareynayo.

Illaalada Dhibaateynta waxaa jiri karo ama aan jirin karin qidmada lagu xareynayo. Fiiri Qeybta B.6 wixii warbixin dheeraad ah. Xafiiska karaaniga wuxuu kuu sheegayaa waxa qidmada xareynta ay tahay. Waxaad weydiin kartaa maxkamadda inay dhaafaan qidmada xareynta haddii aadan awoodin inaad bixisid.

Foomamka ama warbixintee ayaa ah inaan xareeyo?

Fiiri liiska foomamka loo baahanyahay iyo iqtiyaarka ah ee gudaha daboolka hore ee jaheyntaan.

Miyaan heli karaa illaalada amarka isla markaas (iyada oo aan jirin ogeysiinta eedaysanaha xili hore)?

Malaha, haddii garsoore la heli karo si u eego *Cabashadaada* iyo garsooraha ayaa go'aansado cadeynta aad soo gudbisay waxay taageertaa illaalada amarka ku meelgaarka ah. Karaaniga ayaa ku soo ogeysiinayo goorta garsooraha la helayo si u eego codsigaaga oo amarka ku meelgaarka ah.

Haddii garsooraha go'aansado in amarka ku meelgaarka ah an in la sameeyo, waxaad weli go'aansan kartaa inaad horay la'aadid dhageysiga ama ka laabashada dacwada (oo ay la jirto iqtiyaarka buuxinta dambe). Xafiiska karaaniga wuxuu ku soo ogeysiinayaa iyo eedaysanaha taariiqda dhageysiga.

Goorme ayaan aniga iyo eedeysanaha ku soo laabaneynaa dhageysiga ugu dambeeyo?

Ka ilaalinta Xadgudubka: dhageysiga waxaa lagu balamiyaa 21 maalmood gudahood.

Illaalada Dhibaateynta: dhageysi ayaa loo diyaariyaa sida ugu dhaqsiiha badan oo lagu dhaqmi karo, laakin laguma balamin karo 21 maalmood gudahood.

TUSMOOYINKA

HORDHACA.....	1
QEYBTA A — <i>Illaalada Xadgudubka</i>	4
1. Waa maxay xadgudub?	4
2. Yaa weydiin karo maxkamadda illaalada amarka xadgudubka (noqdo dacwoodaha)?	5
3. Yaa ku noqon karo eedeysane illaalada dacwada xadgudubka?	5
4. Sidee ayuu u bilowdaa illaalada dacwada xadgudubka?	5
5. Maxkamadda Degmadee ayaa ah in dacwoodaha aado?	6
6. Qidmooyinka	6
7. Tallooyinka buuxinta Cabasho	6
8. Nidaamka lagu helayo illaalada amarka ku meelgaarka	7
9. Xadeynada xaquuqda eedaysanaha leeyahay, helayo, ama haysto qoryo, hubab kaloo halis ah, ama rasaas	8
10. Adeega eedaysanaha	9
11. Goorma ayaa la qabanayaa dhageysiga ugu dambeeyo ee illaalada dacwada xadgudubka?	10
12. Xaquuqaha iyo masuuliyadaha eedaysanaha ee dacwada illaalada xadgudubka Xaquuqahaaga sida eedaysanaha	10
13. Haddii amarka ku meelgaarka ah ka mamnuuco eedaysanaha haysashada hubab halis ah	12
14. Baraha niyada lagu haynayo ka hor dhageysiga ugu dambeeyo	12
15. Amarka ogolaanshaha (iyada oo aan jirin dhageysi)	13
16. Maxaa dhaca dhageysiga ugu dambeeyo?	14
17. Xalintee lagu dari karaa illaalada amarka xadgudubka?	15
18. Illaa intee ayuu noqon karaa illaalada ugu dambeyso ee amarka xadgudubka ugu dambeeyo?	17
19. Ka waran haddii eedaysanaha ku xadgudubka?	17
20. Badelida ama soo afjarida illaalada amarka ugu dambeyso	17
21. Haddii dacwoodaha rabo in illaalada amarka la kordhiyo	18
22. Illaalada amarka xadgudubka ee ay sameysay maxkamadda gobol kale	18
QEYBTA B — <i>Illaalada Dhibaateynta</i>	20
1. Waa maxay dhibaateyn?	20
2. Yaa weydiin karo maxkamadda dacwada illaalada dhibaateynta? ..	20
3. Yaa ku noqon karo eedaysanaha illaalada dacwada dhibaateynta? ..	20
4. Sidee ayuu u bilowdaa illaalada dacwada dhibaateynta? Ka helida ogeysiinta "yareynta dhibaateynta" fullinta sharciga	20
5. Maxkamadda Degmadee ayaa ah in dacwoodaha aado?	21

6. Qidmooyinka.....	21
7. Tallooyinka lagu buuxinayo cabashada Dhibaateynta	21
8. Miyuu dacwoodaha ka helaa illaalo ku meelgaar ah oo amarka dhibaateynta?	21
9. Goorma ayay dhageysiga ugu dambeeyo lagu qabanayaa illaalada dacwada dhibaateynta?.....	22
10. Adeega eedaysanaha.....	22
11. Xaquuqaha iyo Masuuliyadaha: eedaysanaha ku jiro dacwada illaalada dhibaateynta	23
12. Balansiga dhageysiga ugu dambeeyo ee dacwada illaalada dhibaateynta	23
13. Amarada ogolaanshaha (iyada oo aan jirin dhageysi)	23
14. Maxaa dhaca dhageysiga ugu dambeeyo?.....	24
15. Xalintee ayaa lagu dari karaa illaalada ugu dambeeyso ee amarka dhibaateynta?	24
16. Intee ayay soconeysaa illaalada amarka dhibaateynta?.....	25
17. Ka waran haddii eedeysanaha ku xadgudbo illaalada amarka dhibaateynta?	25
18. Badelida ama balaarinta illaalada amarka dhibaateynta.....	25
19. Illaalada amarka dhibaateynta ee ay sameeyeen gobol kale	25
SHARAXAADA ERAYADA UGU MUHIIMSAN.....	26
LIFAAQA A — Maxkamadaha Degmada.....	31
LIFAAQA B — <i>Xafiisyada Shariifka</i>	33
LIFAAQA C — <i>Warbixinta Guud</i>	34

Muhiimada Dijdmada

Sharuudaha gaarka ah ee la xiriiro dacwadaada waxay ku jirtaa sharciyada, xeerarka, iyo amarada maamulka. Tani waa hagge kaliya.

HORDHACA

Hagahaan wuxuu sharaxayaa sida loo **xareeyo amarka** maxkamadda ku meelgaarka ama ugu dambeeyo ee illaalada **xadgudubka** ama illaalada **dhibaateynta**. Sharciga Maine wuxuu u ogolaanayaa dhibanayaasha qoyska ama xadgudubka shukaansiga, **weerarka galmada**, **dabagalka**, ama dhibaateynta (**dacwoodaha**) si loo helo labadaba illaalada muddada gaaban iyo muddada dheer.

Xadgudubka waxaa ku jiri karo dirista **sawirada gaarka ah**, **galmo ahaan qaawan** oo ay la jirto ujeedada lagu dhibaateynayo, lagu ciqaabayo, ama loogu hanjabayo, ama looga qeybgalayo **ka ganacsiga galmada**, sidoo kale sida noocyada kale ee xadgudubka. Fiiri Qeybta A.1.

Shaqsiaadka lagu eedeeyay xadgudubka, weerarka galmada, dabagalka, ama dhibaateynta (**eedaysanayaasha**) waxay ku tartami karaan sheegashada. Hagahaan wuxuu wataa warbixin oo labadaba ah dacwoodayaasha iyo eedaysanayaasha (**dhinacyada**).

SIDEE AYAY SHARCIYADA U KALA DUWANYIHIIN?

Sharciyada Illaalada xadgudubka iyo illaalada dhibaateynta waxay ku kala duwanyihiin midba midka kale dhoor wado. Inkastoo labada ay yihiin sharciyada rayidka oo ay leeyihiin isla nidaamka maxkamadda guud, sharci walba wuxuu leeyahay sharuudahiisa gaarka ah. Qeybta A ee hagahaan wuxuu sharaxayaa illaalada xadgudubka; Qeybta B waxay la macaamishaa illaalada dhibaateynta. Mararka qaar sharciyada waxaa lagu magacaabaa si wadajir ah sida “sharciyada illaalada.”

Sharciyada illaalada waxaa lagu heli karaa Sharciyada Maine ee Dib loo eegay sida xigta:

Ciwaanka 19-A, Qeybaha 4001-4014 (illaalada xadgudubka);

Ciwaanka 5, Qeybaha 4651-4661 (illaalada dhibaateynta); iyo

Ciwaanka 17 iyo 17-A (qeybaha Xeerka Dambiga Maine ee lagu tixraacay Ciwaanka 19-A iyo Ciwaanka 5).

Sharciyada Dib loo eegay ee Ugu muhiimsan ee Maine waxaa laga heli karaa onleenka: www.mainelegislature.org/legis/statutes. Sharciyada waxaa ku jiro luuqada sharciga gaarka ah iyo sharuudaha ee garsooraha quseyso markii ku go'aansanayo dacwad sida waafaqsan sharciyada illaalada.

ISTICMAALIDA FOOMAMKA MAXKAMADDA

Maxkamadda Degmada Maine waxay leedahay foomamka ah inaad ku isticmaashid dacwadaha illaalada. Karaaniga maxkamadda Degmada waxay ku siin karaan koobiyada foomamka ee la buuxinayo oo waxay ka jawaabi karaan su'aalaha guud. Karaaniyada kuguma caawin karaan go'aansashada foomamka la isticmaalayo ama kuu sheegaan waxa lagu qorayo foomamka. Karaaniyada iyo shaqaalaha maxkamadda looma ogolo inay bixiyaan tallo sharci.

Foomamka badan waxaa lagu buuxin karaa onleenka iyada oo la isticmaalayo kumbuyuutar iyo kadib la daabacayo. Waxaad sidoo kale gacanta ku qori kartaa foomamka.

Haddii aadan laheyn gelitaanka kumbuyuutar ama daabacaha, waxaad la aadi kartaa maktabadda gelitaanka kumbuyuutarka bulshada oo weydii maktabiistaha inuu kugu caawiyo helitaanka foomamka, ama isticmaalida kumbuyuutar iyo daabace oo goob kale. Liiska maktabiistaha bulshada waxaa laga heli karaa: www.maine.gov/msl/libraries/directories/public.

Foomamka onleenka oo labadaba dacwoodayaasha iyo eedaysanayaasha waxaa laga heli karaa: www.courts.maine.gov/fees_forms/forms/index.shtml#pa.

Liiska foomamka oo labadaba dacwadaha illaalada xadgudubka iyo illaalada dhibaateynta oo dacwoodaha iyo eedaysanayaasha waxaa sidoo kale laga heli karaa gudaha daboolka hore iyo bogga xiggo ee hagahaan.

HAGAHAAN WAXAA LOOGU TALLOGALAY UJEEDOYIN WARBIXIN KALIYA

Maxkamad aadida, gaar ahaan haddii aadan laheyn qareen, waxay noqon kartaa mid murugo leh oo caqabad ah. Hagahaan waxaa loo qoray inuu ku caawiyo xisbiyada aan la aqoon ee ku lugleh dacwadaha illaalada. Si looga dhigo hagaha mid aad loo aqrin karo, qaar ka mid ah qeybaha sharciyada, xeerarka ama amarada maamulka ee quseeyo waa la gaabiyay ama la soo koobay.

Markii hagaha tixraaco waxyaabaha dacwoodaha ama eedaysanaha oo ah inuu sameeyo ama laga yaabo inuu sameeyo, magaca "adiga" ayaa la isticmaali karaa. "Adiga" waxaa laga wadaa midkood dhinaca ku jiro dacwada waxay ku xirantahay xiliga qeybta gaarka ah ee hagahaan.

Iyada oo aan isku daynay inaan hubino in warbixinta ay saxantahay oo cadahay, fadlan xasuuso in luuqada sharciyada iyo illaha sharciga uu

yahay erayga ugu dambeeyo. Haddii ay jiraan qilaaf walba oo u dhaxeeyo sharciga iyo hagaha, sharciga ayaa maamulo.

Intaas waxaa dheer, hagaha wuxuu sharaxaa nidaamyada guud iyo sharuudaha sharciyada maamulayo. Go'aanka maxkamadda ee dacwadaha shaqsiyaadka waxay tixgelinayaan xaqiiqahaa gaarka ah iyo xaaladaha dacwad walba.

Waxaan ku darnay eray bixin sahlan oo erayada sharciga ugu muhiimsan dhammaadka hagahaan. Erayada **buuran** waxaa lagu qeexay qeybtaan.

ERAYGA UGU DAMBEEYO OO XAREYNTA NOOC WALBOO DACWADA MAXKAMADDA

Dacwada illaalada xadgudubka iyo dhibaateynta, sida nooc walboo dacwad ah, waa in la bilaabaa kaliya markii kulug lahaanshaha maxkamadda muhiim u tahay illaalada qofka ama hantida waxyeelo dhab ah. Markii aad saxiixdi foomka maxkamadda ama **afidheefidka**, waxaad sheegeysaa in warbixinta ku jirto warqada ay run tahay inta aad ka ogtahay, warbixinta, iyo aaminsantahay. Sharciyada maxkamadda wuxuu dhahayaa in shaqsi walba isagoo og ku sameeyo bayaan been ah warqada maxkamadda ama foomka, ama dhageysiga, wuxuu masuul ka noqonayaa qarashaadka maxkamada, oo ay ku jiraan qidmooyinka qareenka, oo la siiyo xisbiga kale.

Sidoo kale waa dambi in lagu sameeyo dhaar bayaan been ah warqada maxkamadda ama dhageysiga. Intaas waxaa dheer, isticmaalka qaladka ah ee waalidka ee nidaamka illaalada oo isku dayay inuu helo faa'idada furiinka ama dacwada **waalidnimada** waxay u tixgelin kartaa maxkamadda furiinka ama dacwada waalidnimada markii go'aansanayo xaquuqaha iyo masuuliyadaha waalidnimada.

QEYBTA A — *Illaalada Xadgudubka*

1. Waa maxay xadgudub?

- Isku dayga lagu sababayo ama sababayo dhaawaca jirka ama xiriirka xadgudubka, oo ay ku jiraan weerarka galmada;
- Iskudayga lagu gelinayo, ama gelinayo, qof kale cabsi dhaawaca jir ahaanta oo dhinaca hanjabaada, dhibaateynta ama dabeecada ciqaabida;
- Hirgelinta qofka oo xoog ahaan, hanjabaada xooga ama cabsi gelinta lagu sameynayo wax ama aan lagu sameyneynin wax ee qofka xaq u leeyahay ama mudnaan inuu sameeyo ama uusan sameyn;
- Adigoo og si xoog ah u xadeynayo dhaqaaqyada qof kale iyada oo aan jirin ogolaanshaha qofkaas;
- La xiriirida qof hanjabaad lagu sameynayo, ama ku sababayo inay ka go'naato, dambiga halista rabshada ee nolosha aadanaha;
- Si ku celin ah, oo aan laheyn sabab macquul ah, raacitaanka dacwoodaha ama ahaanshaha ama ku jirida nawaaxiga guriga dacwoodaha, dugsiga, ganacsiga, ama shaqada;
- Adiga oo og, oo ay la jirto rabitaanka lagu dhibaateynayo, lagu ciqaabay ama loogu hanjabayo, qeybinta sawir **gaar ah**, ee galma ahaan cad oo dacwoodaha ama qof kale iyada oo aan jirin ogolaanshaha;
- Ka qeybgelida **ka ganacsiga galmada** ama **ka ganacsiga galmada xun**; ama
- **Ka faa'ideysiga dhaqaalaha**, ama si u jeedo ah, oo og, ama taxadar la'aanta mamnuucida baahiyada muhiimka ah, haddii xadgudubka ku lugleeyahay qof weyn oo tababar la'aan ah, qof weyn oo ku tiirsan, ama shaqsiga 60 sanno jir ama ka weyn.

Haddii tallaabooyinka aysan ka koobneyn xadgudub sida si gaar ah loogu qeexay sharciga xadgudubka, dacwoodaha wuxuu rabi karaa inuu sahmio u qalmida ama amarka illaalada dhibaateynta. Fiiri Qeybta B ee hagahaan.

2. Yaa weydiin karo maxkamadda illaalada amarka xadgudubka (noqdo dacwoodaha)?

- Qofka weyn oo ah dhibanah ama diirada xadgudubka;
- Qofka weyn oo matalaada **canuga** oo qofka weyn masuulka ka ah;
- **Canuga oo la xureeyay**; ama
- **Qofka weyn ee la xureeyay** ama **qofka weyn ee ku tiirsan**, ee uu matalo **masuul**.

3. Yaa ku noqon karo eedeysane illaalada dacwada xadgudubka?

- Sey ama sey hore;
- Lamaanaha sharciga ama lamaanaha sharciga hore;
- **Lamaanaha shukaansiga** hadeer ama hore ama lamaanaha wada nooshihiin;
- **Xubin qoyska ama guriga** hadeer ama hore
- **Darbixiyaha aan la mushaar**in ama **xubinta qoyska balaaran**, haddii dacwoodaha uu yahay 60 sanno jir ama ka weyn; ama
- Qof walba oo sameeyo weerarka galmada, ka qeybgalo dabagalka, ka ganacsiga galmada, ka ganacsiga galmada xun, ama adigoo og u qeybisid sawiro gaar ah, galmo ahaan qaawan ee dacwoodaha iyada oo aan ogolaansho jirin.

4. Sidee ayuu u bilowdaa illaalada dacwada xadgudubka?

Dacwoodayaasha:

1. Buuxi **Cabashada Illaalada Xadgudubka (PA-001) (Cabashada)** iyo foomamka kale ee quseeyo (fiiri liiska foomamka ku jiro hagaha).
2. Ku saxiix foomamka horida nootaayada, qareen, ama karaaniga maxkamadda, oo sii foomamka xafiiska karaaniga Maxkamadda Degmada.

Waxaad u aadi kartaa xafiiska karaaniga qof ahaan si aad u buuxisid oo u gudbisid foomamka ama waxaad ku buuxin kartaa foomamka onleenka, daabac, iyo kadib gey Maxkamadda Degmada si aad u xareysid. Xafiiska karaaniga wuxuu bixin karaa caawinta karaaniga oo

kaa caawinayo buuxinta foomamka, laakin kuuma sheegi karo waxa lagu qoro foomamka ama ku siiyo tallo sharci.

Amarka illaalada xadgudubka wuxuu shaqeynayaa markuu saxiixo garsoore. Si kastaba, amarka waa in la siiyaa eedaysanaha ka hor inta uu isaga ama iyada lagu dalacin dambiga oo ku xadgudubka amarka, illaa eedaysanaha haysto ogeysiin dhab ah ee amarka illaalada. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan eedaysanaha, fiiri Qeybta A.10.

5. Maxkamadda Degmadee ayaa ah in dacwoodaha aado?

Booqo goobta Maxkamadda Degmada halka aad ku nooshahay, halka eedaysanaha ku noolyahay, ama halka aad hadeer dagantahay haddii aad uga guurtay guriga sababo amni.

Liiska Maxkamadda Degmada waxaa laga heli karaa dhammaadka hagahaan oo Lifaafa A iyo onleenka:

www.courts.maine.gov/maine_courts/district.

6. Qidmooyinka

Ma jiraan qidmooyinka xareynta maxkamadda ama adeegyada oo dacwadaha illaalada xadgudubka.

7. Tallooyinka buuxinta Cabasho

U buuxi foomka *Cabashada* si buuxdo.

Nasii sharaxaado badan sida suurtoogalka ah. Maxaa *gaar ah* ayuu eedaysanaha sameeyaa ama dhahaa, dhaawacyadee ama waxyeeladee ayaad (ama, haddii aad ku gudbineysid matalaada dacwoodaha canuga), la dhibaatoodo, ama halis ugu jiro dhibaato? Si sahlan ha u sheegin, “Eedaysanaha ayaa i dabagalay,” ama “Eedaysanaha ayaa iigu hanjabay inuu dhibaateynayo canugeyga.”

Sheeg sharaxaadaha *aadka dhabta u ah* iyo xadgudub *hadeer* marka koowaad. Hubi inaad ku dartid taariiqaha iyo waqtiyada.

Haddii aadan rabin in eedaysanaha ogaado halka aad u dagantahay sababaha badbaadada, buuxinta iyo xareynta *Afidheefidka oo Ciwaanka Qarsoodiga ah/Lambarka Teleefonka foomka* (PA-015). Eedaysanaha uma suurtoogaleyso inuu arko ciwaankaaga hadeer ama lambarka taleefonka. Maxkamadda waxay, si kastaba, u baahantahay inaad haysid warbixintaada xiriirka si markaas xafiiska karaaniga uu kaala soo xiriiri karo wax ku saabsan dacwada.

Qeybta ugu dambeyso ee foomka *Cabashada* wuxuu ku weydiinayaa inaad saxdid sanduuqyada oo **xalinta** aad codsaneysid. Hubi inaad

saxdid sanduuq walba ama dhammaan sanduuqyada aad jeclaan laheyd in maxkamada tixgeliso.

Ogeysiin karaaniga ciwaan walboo isbadelo. Waxaad isticmaali kartaa foomka *Ogeysiinta Badelka Ciwaanka (CV/CR-199)* oo sidaas sameynayo.

Xaaladaha gaarka ah

Sawirada galmo ahaan qaawan

Haddii dacwadaada ku lugleedahay eedaysanaha oo siideynayo sawirada gaarka, galmo ahaan qaawan iyada oo aan ogolaansho jiri, sawiro walba ee lala gudbiyo *Cabashada* waxaa si toos ah loogu meeleeeyaa sida waafaqsan tiimbaraha. Tani waxay la micna tahay sawirada uma suurto-galeysa in la eego ama loo siidaayo bulshada. Eedaysanaha iyo qareenka eedaysanaha kaliya ayaa u suurto-galeysa kaliya inay ku eegaan sawirada maxkamadda, iyo kaliya ujeedada diyaarinta jawaabta *Cabashada*.

Qoryaha ama hubabka halista ah

Maxkamadda waxay ka mamnuuci kartaa eedaysanaha haysashada hubabka ama hubabka kale ee halista ah ee dacwada illaalada haddii sharuudaha qaarkood la buuxiyo. Fiiri Qeybta A.9 wixii warrbixin sharaxan.

8. Nidaamka lagu helayo illaalada amarka ku meelgaarka

Garsooraha wuxuu bixiyaa **amar ku meelgaar ah** haddii garsooraha aaminsanyahay warbixinta aad keentay inay u qalanto amar.

Karaaniga ayaa kuu sheegayo haddii garsooraha u suurto-galeysa inuu eego *Cabashada* markii aad gudbisid oo wuxuu ku siinayaa warbixin kale ee ku saabsan waxa dhacayo marka xigta.

Waxaa lagu weydiin karaa inaad ku sugtid qolka maxkamadda illaa garsoore eegi karo *Cabashada*. Raac tilmaamaha karaaniga.

Garsooraha wuu ku wareysan karaa ama ku weydiin karaa su'aalo dheeraad ah oo xadgudubka ku saabsan. Haddii garsooraha aaminsanyahay warbixinta aad bixisay inay u qalanto xalinta degdega, garsooraha wuu saxiixayaa amarka.

Illaalada ku meelgaarka waxaa ku jiri karo xalinta qaar ama dhammaan xalinta aad ku weydiisay *Cabashada*.

Amarka illaalada ku meelgaarka wuxuu bilaabanayaa markii uu saxiixo garsooraha laakin amarka waa in la siiyaa eedaysanaha ka hor inta uu isaga ama iyada lagu dalacin dambiga oo ku xadgudubka amarka, illaa eedaysanaha haysto ogeysiin dhab ah ee amarka.

Maxkamadda ayaa ku balamineyso dhageysiga gudaha 21 maalmood ka bilow taariiqda dacwada la xareeyay. Amarka illaalada xadgudubka ugu dambeyso waxay soconeysaa labo (2) sanno.

Haddii aad ka laabatid dacwada ka hor dhageysiga ugu dambeeyo, amarka walboo illaalada ku meelgaarka ee la bixiyay markale ma shaqeynayo.

9. Xadeynada xaquuqda eedaysanaha leeyahay, helayo, ama haysto qoryo, hubab kaloo halis ah, ama rasaas

Sharciga Maine

Sharciga Maine wuxuu u ogolaanayaa garsooraha inuu mamnuuco (ka mamnuuco) eedaysanaha inuu haysto qori ama **hub kaloo halis ah** inta lagu jiro amarka illaalada xadgudubka ku meelgaarka ama ugu dambeeyo. Sharuudaha hoose waa in la buuxiyaa ka hor inta uusan garsooraha amrin midaan.

Si markaas looga mamnuuc eedaysanaha haysashada hubab halis ah, garsooraha waa inuu ogaadaa in:

- Xadgudubka ku lugleh isticmaalka ama hanjabaada isticmaalida qori ama hub halis ah; *ama*
- Halista kordheyso ee xadgudubka markaas ah wuu kuu jiraa (dacwoodaha) ama canuga ee qoyska ku nool.

Waa inaad ku sheegtaa warbixin gaar ah, sharaxan ee isticmaalka eedeysanaha ama hanjaabada ee *Cabashada*.

Sharciga Federaalka

Waxay ku xirantahay xiliga xaqqiqa gaarka ah ee dacwada, sharciga faderaalka wuxuu sidoo kale quseyn karaa xaquuqda eedaysanaha leeyahay, helayo, ama ku haysto qoryo ama rasaas inta lagu jiro **amarka ugu dambeeyo**.

Mamnuucidaan faderaalka ee quseynayo dacwada, eedaysanaha waa inay lahaataa ogeysiin dhab ah iyo fursada looga qeybqaadanayo dhageysiga.

Amarka illaalada, garsooraha wa inuu sameeyaa **xaqqiqa natiijo dhab ah** ee:

- Eedaysanaha soo bandhigo hanjabaad la aamini karo ee badbaadada jirka ee dacwoodaha ama canuga ee qoyska ku nool; *ama*

- Amarka waa inuu si cad ugu mamnuuca eedaynaha isticmaalka, isticmaalka la isku dayay, ama ku hanjabo isticmaalka xooga jirka ee ka soo horjeedo dacwoodaha ama canuga ee ku nool qoyska oo si macquul ahlooga filanayo sababida dhaawaca jirka. (Fiiri Ciwaanka 18 ee Xeerka Mareykanka, Qeybta 922(g)(8).)

Qeybaha kale ee sharciga faderaalka waxay quseyn kartaa mamnuucidaan, ama sheeg marka laga reebo mamnuucidaan. Raadi caawinta sharciga haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan haddii mamnuucidaan faderaalka ay quseyso ama ay quseyn karto dacwadaada.

Sheegida warbixinta hubabka halista

Dacwoodayaasha:

Haddii aad garanaysid hubabka halista ah eedaynaha qabo, hubi inaad ugu sharaxdid sida sharaxaad badan oo suurtoagal ah. Sharax nooca hubabka, tirada hubabka, waxa hubabka u egyihiin, iyo halka inta badan lagu hayo.

10. Adeega eedaynaha

Haddii maxkamadda siiso amarka illaalada ku meelgaarka, waxay si guud u diyaarineysaa adeega eedaynaha. "Adeega" ama "siinta" qofka waxaa loo yaqaan ogeysiin siinta dacwada ee eedaynaha. Sarkaalka fullinta sharciga (ku xigeenka shariifka ama sarkaalka booliska deegaanka) wuxuu u siinayaa eedaynaha qof ahaan (sidoo kale loo yaqaan "gacan ahaan.") Maxkamadda waxay marmarka qaar weydiinayaan dacwoodaha rabo inuu sidaas sameeyo si u qaato koobiyada ee waraaqaha maxkamadda ee waaxda boolisja ama xafiiska shariifka si u dadajiyo adeega eedeysanaha. Lagaama rabo inaad sameysid midaan.

Intaas waxaa dheer waraaqaha koobiyada, koobiyada korontada waxaa sidoo kale loo gudbinayaa fullinta sharciga. Waraaqaha maxkamadda waa la bixinayaa haddii saraakiisha booliska ama shariifka kula kulmaan eedeysanaha joogsiga baabuurta, tusaale ahaan.

Eedaynaha waxaa la siinayaa xittaa haddii aad badeshid maskaxdaada oo aad go'aansatid inaad siisid koobiyada waraaqaha maxkamadda ee fullinta sharciga oo adeega gacanta.

Sarkaalka fullinta sharciga ee u adeegayo eedaynaha wuxuu qorayaa taariiqda iyo saacada eedaynaha la siiyay. Tani waxaa loo yaqaan "cadeynta adeega." Cadeynta adeega waa muhiim sababtoo ah

maxkamadda ma qabaneyso dhageysiga ugu dambeeyo haddii uusan laheyn cadeynta in eedaysanaha helay ogeysiin rasmi ah ee dacwada.

Waxaad rabi kartaa inaad dabagashid waaxda booliska ama xafiiska shariifka si aad u ogaatid markii eedaysanaha la siinayo. Samey qoraalka warbixintaan oo dhageysiga ugu dambeeyo ah.

Waraaqah ee maxkamada ayuu helayaa eedaysanaha?

Eedaysanaha wuxuu helayaa *Maxkamadda uga yeerid/Amarka Illaalada (PA-004)* oo ogeysiineyso eedaysanaha halka iyo goorta dhageysiga ugu dambeeyo la qabanayo.

Eedaysanaha wuxuu sidoo kale helayaa koobiga *Cabashada*, iyo haddii la sameeyo, amarka illaalada ku meelgaarka ah.

Goorma ayaa amarka illaalada ku meelgaarka uu shaqeynayaa?

Amarka illaalada ku meelgaarka wuxuu shaqeynayaa sida ugu dhaqsiiha badan ee uu saxiixo garsooraha. Si kastaba, eedaysanaha waa inuu haystaa ogeysiin dhab ah ee amarka ku meelgaarka ah, ama la siiyay amarka, si markaas loogu dalaco dambiga ku xadgubideeda.

11. Goorma ayaa la qabanayaa dhageysiga ugu dambeeyo ee illaalada dacwada xadgudubka?

Haddii garsooraha siiyo ama uusan siinin amarka illaalada ku meelgaarka (haddii aad weydiisay hal), dacwadaada waxaa loo balaminayaa **dhageysi** ugu dambeeyo oo 21 maalmood gudahood illaa aad ka laabatid dacwada.

Haddii dacwada laga laabto (laga tanasulay **iyada oo aan jirin naceyb**), waxaad xareyn kartaa dacwad cusub oo taariiq dambe ah.

12. Xaquuqaha iyo masuuliyadaha eedaysanaha ee dacwada illaalada xadgudubka Xaquuqahaaga sida eedaysanaha

Haddii aad tahay eedaysanaha dadwacada illaalada xadgudubka, waxaad xaq u leedahay inaad:

- Heshid koobiga *Cabashada* la gudbiyay dacwada;
- Heshid ogeysiinta taariiqda, waqtiga, iyo goobta dhageysiga ugu dambeeyo;
- U gudbi jawaab qoran *Cabashada* dacwoodaha (looma baahno);

- Ka qeybgal dhageysiga ugu dambeeyo oo soo bandhig cadeynta oo matalaadaada ah, oo ay ku jiraan marqaati furka iyo u yeerida marqaatiyada oo lagu taageerayo dhinacaaga dacwada;
- Codsiga in xafiiska karaaniga sameeyo **codsiga maxkamadda** oo marqaatiga imaanayo dhageysiga, haddii muhiim u tahay hubinta in marqaatiga imaado.
- Weydii maxkamadda inay **badesho** (badelka) ama **lagu joojiyo** (ka saarida) amarka illaalada ku meelgaarka; iyo
- Kireyso qareen ama raadi caawin kale oo looga jawaabo ama lagu diyaariyo difaacid. Warbixinta illaha sharciga waxaa laga heli karaa gadaasha daboolka ee hagahaan.

Masuuliyadahaaga sida eedaysanaha

Haddii aad tahay eedaysanaha ku jiro dacwada illaalada xadgudubka, iyo waxaad heshay amarka illaalada ku meelgaarka, waa inaad u hogaansanaataa dhammaan qeybaha iyada oo shaqeyneyso. Haddii aadan sameyn, waxaa kugu waajib ah xiritaan iyo dalacaadyada dambiga.

Kaliya garsooraha ayaa badeli karo qodobada amarka illaalada ku meelgaarka. Dacwoodaha ma badeli karo qodobada ama ku siiyo ogolaansho loogu xadgudubayo qodobada. Tusaale, haddii amarka kumeelgaarka kaa mamnuuc gelitaanka guriga aad la wadaagtay dacwoodaha, waxaa laguugu dalacayaa dambiga haddii aad gashid guriga, xittaa haddii dacwoodaha ku casuumo. Xadgudubka amarka illaalada ku meelgaarka waa dambiga Heerka D ee wataa ciqaabaha oo illaa 364 maalmood xabsi ah iyo/ama ganaax ah \$2,000.

Codsiga lagu badelayo ama la joojiyo amarka ku meelgaarka ah

Haddii aad rabtid inaad weydiisid maxkamadda inay badesho ama lagu joojiyo amarka ku meelgaarka ah, isticmaal foomka: **Mooshinka Eedaysanaha ee lagu Joojinayo Amarka Ku meelgaarka ah oo Illaalada ama Mooshinka lagu Badelayo/Amarka Illaalada Badelka (PA-010)**.

- Foomka *PA-010* waxaa laga heli karaa onleenka, ama ka bilow xafiiska karaaniga Maxkamadda Degmada. Foomamka onleenka waxaa laga heli karaa: www.courts.maine.gov/fees_forms.
- Haddii aadan laheyn gelitaanka kumbuyuutarka ama daabacaha oo aad rabtid inaad ku buuxisid foomka onleenka, waxaad aadi kartaa maktabada leh gelitaanka kumbuyuutarka bulshada oo weydii maktabiistaha inuu kugu caawiyo foomka. Markii aad

dhameystirtid foomka, saxiix horida nootaayada, qareenka, ama karaaniga, oo ku xarey Maxkamadda Degmada.

- Ma jiraan qidmada lagu gudbinayo foomka *PA-010*. Waxaad ku buuxin kartaa foomamka gacan ahaan.
- Haddii aad codsanaysid in maxkamada badeshay ama lagu joojinayo amarka illaalada ku meelgaarka, dacwoodaha waa in la siiyaa ogeysiin 48 saacadood ka horeyso dhageysiga illaa garsooraha dajiyaa waqti gaaban.

Haddii aad gudbisid ama aadan gudbin jawaab qoran, haddii aad rabtid inaad ka hor imaatid codsiga dacwoodaha oo xalinta, ama wax un ka dhex dacwada, waa inaad ka qeybgashaa dhageysiga ugu dambeeyo.

Haddii aan lagu siin (aadan ka helin ogeysiin maxkamadda) ee taariiqda dhageysiga, maxkamadda waxay dib u balamineysaa dhageysiga taariiqda dambe.

Ogeysiin xafiiska karaaniga ciwaan walboo isbadelo. Waxaad isticmaali kartaa foomka *Ogeysiinta Badelka Ciwaanka (CV/CR-199)* oo sidaas sameynayo.

13. Haddii amarka ku meelgaarka ah ka mamnuuco eedaysanaha haysashada hubab halis ah

Haddii amarka ku meelgaarka ah kaa mamnuuco haysasha qoryo ama hubab kaloo halis ah, waa inaad ku wareejisaa sheeyada la qeexay ee sarkaalka fullinta sharciga ama qofka kale sida lagu qeexay amarka.

Haddii amarka kaa illaaliyo inaad soo wareejisid sheeyada la qeexay qof aan ka aheyn sarkaalka fullinta sharciga, waa inaad xereysaa bayaan aqoonsanayo qofkaas oo qorayo dhammaan sheeyada la soo wareejiyay. Bayaanka waa in lagu xareeyaa gudaha 24 saacadood oo soo wareejinta oo la siiyay midkood maxkamadda ama waaxda booliska deegaanka ama xafiiska shariifka. Qoryaha ama hubabka kale ee halista ah waa in lagu wareejiyaa gudaha waqtiga lagu sheegay amarka.

14. Baraha niyada lagu haynayo ka hor dhageysiga ugu dambeeyo

Kariiniga wuxuu balaminayaa dhageysiga ugu dambeeyo ee illaalada dacwada xadgudubka oo gudaha 21 maalmood ee buuxinta *Cabashada*.

Eedaysanaha waa inuu helaaa ogeysiin rasmi ah ee dacwada (la siiyay) si markaas dhageysiga ugu dambeeyo loo qabto. Haddii eedaysanaha aan la siinin taariiqda dhageysiga ugu dambeeyo, maxkamada waxay dib u balamineysaa dhageysiga taariiq dambe.

Haddii eedaysanaha aan la siinin taariiqda dhageysiga ugu dambeeyo, dacwoodaha waa inuu weli aadaa maxkamadda taariiqdaas si u hubiyo dacwada inaan laga tanaasulin iyo in amar walboo ku meelgaarka shaqeeyo.

Labada dhinacba waa inay aadaan dhageysiga ugu dambeeyo ama aad ugu dhowyahay sharciga ka soo horjeedo dhinaca maqan. Haddii dacwoodaha uusan ka qeybgalin dhageysiga, garsooraha inta badan wuu ka tanasulayaa dacwada. Haddii dacwada laga tanasulo, amarka walboo illaalada ku meelgaarka markale ma shaqeynayo.

Haddii eedaysanaha uusan aadin dhageysiga, garsooraha wuxuu inta badan saxiixayaa amarka illaalada ugu dambeeyo ee xadgudbka.

Codsashada dib u dhigida dhageysiga

Haddii dacwoodaha ama eedaysanaha qabo xaalado degdega ah oo aan ka qeybgali karin dhageysiga taariiqdaas balansan, dhinacaas waa inuu ogeysiyaa maxkamada sida ugu dhaqsiiha badan oo suurtoogalka ah oo codsado **joogteynta** (dib u dhigida) oo qoraal ahaan ah. Garsooraha ayaa go'aansanayo haddii la siinayo codsi joogteynta ah.

15. Amarka ogolaanshaha (iyada oo aan jirin dhageysi)

Ka hor inta uusan bilaaban dhageysiga ugu dambeeyo, garsooraha wuxuu weydiin karaa dhinacyada haddii ay rabaan inay tixgeliyaan gelida amarka illaalada oo ogolaansho ah badelkii aad yeelan laheyd dhageysi buuxo.

Amarada ogolaanshaha inta badan waxay shaqeeyaan kadib markii garsooraha kula hadlo dhinacyada maxkamadda, ama dhinaca aadista-u dhaxeeyso sida u doodayaasha ama qareenada rabshada qoyska. Haddii ay jirto amarka illaalada ku meelgaarka oo ka mamnuucayo xiriirka u dhaxeeyo eedaysanaha iyo dacwoodaha, waa inaysan jirin wadahadal toos ah ama xiriir u dhaxeeyo dhinacyada iyada oo aan jirin xaadirirtaanka garsooraha.

Amarada ogolaanshaha waxaa ku jiro isla illaalooyinka oo leh isla saameynta sharciga oo in amar la sameeyay kadib dhageysiga markii la yeesho. Eedaysanaha waxaa quseeyo xiritaanka iyo xukumida ku xadgudbida amarka ogolaanshaha sida la midka ah sida isaga ama iyada ay noqon lahaayeen ku xadgudubka amarka la sameeyay dhageysiga kadib.

Si kastaba, amarka ogolaanshaha waxaa la sameeyaa iyada oo uusan helin xaqiiqda garsooraha in eedaysanaha sameeyay xadgudubka, weerarka galmada, ka ganacsiga galmada, dabagalka, ama qeybinta sawirka gaarka, galmo ahaan qaawan.

16. Maxaa dhaca dhageysiga ugu dambeeyo?

Dhageysiga ugu dambeeyo waa waqaf oo waxaa lagu qabtaa garsooraha hortiisa.

Soo bandhigida dacwada

Sida dacwada maxkamadda walboo rayid ah, dacwoodaha ayaa aado marka koowaad oo haysto culeysko ku cadeynayo **eedeymaha** ku jirto *Cabashada*.

Eedaynaha wuxuu helayaa fursada lagu soo bandhigayo difaaciisa ama difaaceeda dacwoodaha kadib.

Dacwoodaha wuxuu weydiinayaa maxkamadda inay siiso noocyada gaarka ah ee xalinta ku jirto *Cabashada*. Fiiri Qeybta A.17. Eedaynaha waa inuu u diyaarsanaadaa sharaxida sababta xalinta dacwoodaha u codsaday aan loo siinin, ama u soo jeediyo diyaarino kale. Haddii eedaynaha aaminsanyahay in dacwada dacwoodaha la xareeyay iyada oo aan jirin aasaas, eedaynaha waa inuu diyaar u ahaadaa inuu soo bandhigo cadeynta midaan.

Labadaba dacwoodaha iyo eedaynaha waa inay diyaar u ahaadaan soo bandhigida cadeynta, cadey, iyo haddii ay muhiim tahay, ugu yeer marqaatiyada dhageysiga.

Intaas waxaa dheer dhinacyada, shaqsiyaadka og xaalada gaarka ah ee waxa dhacay ayaa ku marqaati furi karo. Haddii dacwada lagu keeno matalaada canuga ka hooseeyo da'da 18, canuga waxaa malaha looga baahanayaa inuu ku marqaati kaco illaa dacwoodaha ama marqaati kale uu ogyahaya xaalada gaarka ah ee waxa dhacay oo wuu ku marqaati kici karaa badelkii.

Sida dacwadaha kale ee maxkamadda rayidka, dhageysiga ugu dambeeyo wuxuu quseeyaa Sharciyada Maine ee Cadeynta, taas oo xadeyso nooca warbixinta ee garsooraha laga yaabo inuu tixgeliyo. Maxkamadda waxay xukumaysaa diidmooyin walba.

Yaa ka soo qeybgali karo dhageysiga?

Dhinacyada waxaa la socon karo saaxibo iyo xubnaha qoyska, oo ku caawinaya u doodayaal ama qareeno dhageysiga. Dadka taageerada kuma marqaati kicii karaan haddii aysan haynin ogaanshaha xaalada gaarka ah ee dhacdooyinka lagu qeexay *Cabashada*.

Haddii dhinacyada ay yihiin waaladiinta carruurta yar

Haddii dacwoodaha iyo eedeysanaha ay yihiin waaladiinta carruurta yar, labada dhinacba waa inay keenaa *Afidheefidka Taageerada Canuga (FM-*

050) oo dhameystiran dhageysiga ugu dambeeyo illaa amarka taageerada canuga horay u diyaarsanyahay. Garsooraha wuxuu weydiin karaa su'aalo ku saabsan daqliga. Haddii amar la siiyo, garsoortaha waxay ku jaheyn karaa lacag bixinta taageerada canuga haddii aysan jirin amarka taageerada canuga ee horay u diyaarsan.

17. Xalintee lagu dari karaa illaalada amarka xadgudubka?

Amarka illaalada xadgudubka waxaa ku jiri karo mid ama ka badan oo kuwa xiggo:

1. Eedaysanaha ma dhibaateynayo, ugu hanjabayo ama dhaxgalayo dacwoodaha iyo carruurta walba ee ku nool guriga dacwoodaha;
2. Eedaysanaha lama yeelanayo **xiriir toos ah** ama **toos aheyn** dacwoodaha;
3. Eedaysanaha wuu ka fogaanayaa guriga dacwoodaha, dugsiga, ganacsiga ama shaqada;
4. Eedaysanaha ma dabagalayo ama ma raacayo dacwoodaha;
5. Eedaysanaha ma haysanayo qoryo ama hubab kaloo halis ah;
6. Eedaysanaha ma qaadayo, ma iibinayo, ma waxyeelayo ama ma baabi'inayo hanti walba ee ka mid ah dacwoodaha guud ahaan ama qeyb ahaan;
7. Eedaysanaha ma dhaawacayo ama uguma hanjabayo inuu dhaawaco xayawaan walboo leeyahay ama hayo midkood xisbiga;
8. Eedaysanaha ma qeybinayo sawirada gaarka ah, galmo ahaan qaawan ee dacwoodaha; iyo
9. Eedaysanaha ma baabi'inayo, ma wareejinayo ama qaribida baasaboorka dacwoodaha ama waraaqaha kale ee socdaalka ee uu hayo eedeysanaha.

Amarka wuxuu sidoo kale:

1. Siinayaa haysashada ku meelgaarka ah ee guriga ee dacwoodaha ama eedaysanaha;
2. Siinta qeybta hantida shaqsiga;

3. Siinta haynta, maamulida ama daryeelka xayawaan walba ee leeyahay ama hayo midkood labada dhinac ama canuga ee dagan qoyska;
4. U baahanyahay in eedaynaha bixiyo taageerada ku meelgaarka ah ee dacwoodaha, qasaaraha daqliyada, waxyeelada hantida, ama qarashaadka gururida;
5. Waxay u baahantahay joojinta xeerka caymiska noloshu ee walba ee eedaynaha cayminayo dacwoodaha, oo ay la jirto koobiga amarka ee loo dirayo shirkada caymiska;
6. U baahan yahay in eedaynaha helaa la talin oo ka qeybgalaa barnaamijka wax qabadka weeraraayaasha shahaadeysan;
7. Uga baahan eedaynaha inuu ka saaro, baabi'iyayo, ama ku soo celiyo dacwoodaha sawiro walboo gaarka ah, galmo ahaan qaawan, ama bixiyo qarashaadka la xiriiro ka saarida, baabi'inta, ama soo celinta sawirada; iyo
8. Bixi waxyeelooyinka la xiriiro soo celinta ama dib u soo celinta baasaboorka dacwoodaha ama warqada kale ee socdaalka iyo bixiyo deymo walba ee dacwoodaha oo ka imaanayo xiriirka ka ganacsiga galmada.

Haddii dacwoodaha iyo eedaynaha carruurta wada leeyihiin, amarka waxaa sidoo kale ku jiri karo hal ama ka badan oo kuwa xiggo:

1. Siinta xaquuqaha waalidnimada ku meelgaarka ah (dagaha koowaad iyo boqashada);
2. Amarka lacag bixinta taageerada canuga, oo ay ku jiraan ka hakinta joornaatiga oo markaas ah si looga qaado taageerada; iyo
3. Amarka afidheedhyada xareynta taageerada canuga haddii aan horay loo sameyn.

Garsooraha wuxuu ku amri karaa eedeysanaha inuu bixiyo qarashaadka maxkamada iyo/ama qidmooyinka qareenka macquulka ah.

Garsooraha wuxuu awoodaa in amarka kale ee dacwoodaha bixiyo qarashaadka maxkamada iyo/ama qidmooyinka qareenka macquulka ah, laakiin kaliya haddii qasaarooyinka dacwoodaha dacwada iyo maxkamada go'aansadaan *in Cabashada* **xaqiiq malaheyn**.

Amarka wuxuu qeexayaa xalinta kale ee walba oo muhiim ah oona ku haboon.

